

## **Nabadeey dadka dhigta Waxbarashada dadka waaweyn!**

Sida hubaal ahaan aad idinkuba u ogtihiin faafida cudurka Covid-19 way ku korodhay gobolkeena oo dhamaanteen waxaa la ina faray adkeynta talooyinka inaynu ku dhaqano si loo yareeyo faafida cudurkan. Tababaryada waa la joojiyay, dhamaan isku imaatinyada bulshada sida xafladaha iyo munaasabada waa in la iska ilaaliyo oo booqashada dukaanada iyo meelaha kale ee dadweynaha ka dhaxeeya waa la xadeeyay.

## **Sidan ayaa ka dhici doonta dhanka Waxbarashada dadka waaweyn**

Si caawimaad looga geysto xaaladan adag ee bulshada waxaa Kunskapsförbundet go'aamisay in dhamaan waxbarashada dhanka dadka waaweyn ee lagu fulin karo iyadoo leh tayo sideeda loo sii hayn karo inay u dhacdo qaab ah iyadoo aan la joogin goobta.

- Go'aankan wuxuu ansax yahay ilaa iyo 19 Noofambar oo ay dhici karto in la sii dheereeyo.
- Adigu waxaad macluumaadka aad u baahantahay ka heli doontaa macallinka wax kuu dhiga.

Waanu ognahay inaad horeyba u ogeyd, laakiin haddana waanu idin xusuusinaynaa:

Si wadajir ah ayaynu u joojin karnaa faafida cudurkan si aynu u helno inaynu mar kale u helno nolol caadi ah. Waa taas arrinta aynu rajeyneyno dhamaanteen. Laakiin ugu horeyn waxaynu ku dadaalaynaa inaynu joojino faafida cudurkan iyadoo la is caawinayo.

- Guriga joog haddii aad leedahay xitaa wax yar oo calaamado xanuun ah. Baaritaan iska qaad.
- Gacmahaaga dhaq.
- Baaskiil ama lug ku imo iskoolka haddii ay suurtagal tahay.
- Dadka kale ka durug masaafo ahaan!

Halkan ka akhri wixi dheeraad ah ee ku saabsan talooyinka guud ee la adkeeyay iyo kuwa guud ahaanba:

<https://www.folkhalsomyndigheten.se/nyheter-och-press/nyhetsarkiv/2020/oktober/beslut-om-skarpta-allmanna-rad-i-stockholms-lan-vastra-gotalands-lan-och-ostergotlands-lan/>

Salaan diiran,  
Kunskapsförbundet